City of Boston
Emergency Management

# GUUDMARKA QORSHEYNTA SII-WADISTA GANACSIGA

## GUUDMAR

Buuga Hagaha Qorsheynta Sii-wadista Ganacsiga waxaa diyaariyay Xafiiska Maareynta Xaaladaha Degdegga ah ee Magaalada Boston si loo xoojiyo ganacsiyada si ay isugu diyaariyaan, u sii shaqeeyaan inta lagu guda jiro xaaladaha degdegga ah iyo carqaladaha, isla markaana uga soo kabtaan. Baro aasaasiyaadka qorsheynta sii-wadista ganacsiga, samee Qorshe Hawleedka Xaaladaha Degdegga iyo Qorshaha Sii-wadista Ganacsiga oo adiga kuu gaar ah, oo tijaabi qorshooyinka adigoo isticmaalaya foomamka iyo tilmaamaha ku xusan buugga hagaha.

## QEYBAHA BUUGGA HAGAHA

Buugga Hagaha Qorsheynta Sii-wadista Ganacsiga wuxuu ka kooban yahay:

1. **Guudmarka Qorsheynta Sii-wadista Ganacsiga**
2. **Hagaha Qorsheynta Sii-wadista Ganacsiga**: Waa buug-tilmaameed loogu talagalay sameynta iyo tijaabinta qorshooyinkaaga.
3. **Hageyaasha Qorshe Hawleedka Xaaladaha Degdegga ah iyo Ka Fal Celinta:** Waa foom qorsheed ka caawinaya ganacsiyada sidii ay u ilaalin lahaayeen dadka iyo hantida inta lagu guda jiro xaalad degdeg ah, wuxuuna ka kooban yahay:
    a. Habraacyada Wada-xiriirka ama Xog Isgaarsiinta
    b. Foomka Qorshaha Ka-bixitaanka iyo Ka-saarista Dadka Goobta
    c. Foomka Qorshaha Ku-sugnaanta Goob Amaan ah Inta Lagu Guda Jiro Xaalad Degdeg ah
    d. Tilmaamo ku saabsan Ilaalinta Hantida iyo Qalabka
    e. Hageyaasha Ka Fal Celinta Xaaladaha Degdegga ah oo loogu talagalay khataraha ama xaaladaha qaar (dabka, xaalad caafimaad, koronto la'aan, weerar dhanka interneetka ah, fatahaad, iwm.)
4. **Qorshaha Sii-wadista Ganacsiga**: Waa foom qorsheed ka caawinaya ganacsiyada inay sii shaqeeyaan, isla markaana dib ugu soo noqdaan hawlahooda caadiga ah kadib markii ay dhacdo xaalad degdeg ah ama carqalad. Foomka Qorshaha wuxuu ka kooban yahay:
    a. Liiska Hubinta Qorsheynta
    b. Istaraatiijiyadaha Sii-wadista iyo Dib usoo Celinta Hawlaha Muhiimka ah ee Ganacsiga (Sidoo kale waxaa ku jira: 4.1 Warqada Weydiimaha Hawlaha Muhiimka ah ee Ganacsiga iyo 4.2 Warqada Weydiimaha Istaraatiijiyadaha Sii-wadista iyo Dib usoo Celinta)
    c. Habraacyada Wada-xiriirka ama Xog Isgaarsiinta
    d. Tilmaamaha Casriyeynta Qorshaha
    e. Hageyaasha Ururinta Macluumaadka Muhiimka ah
5. **Tababarka iyo Layliyada Sii-wadista Ganacsiga** :Waa Nidaam layliyeed oo qeybo kala duwan leh iyo tilmaamo lagu tijaabinayo waxtarka qorshooyinkaaga iyo awoodda shaqaalahaaga ee hirgelinta

qorshooyinka.
(Sidoo kale waxaa ku jira: Warqada Weydiimaha Su'aalaha Looga Doodayo Layliga)

Lasoo dag buugga hagaha oo bilow wax qorsheynta maanta si aad u ilaaliso ganacsigaaga. Wixii faahfaahin dheeri ah, fadlan booqo Boston.gov/emergency ama nagala soo xiriir BostonRCPGP@boston.gov.

**Haddii buugga hagaha aanan horay loogu tarjummin luqaddaada koowaad, fadlan nagala soo xiriir BostonRCPGP@boston.gov si aad u codsato turjumaad.**